



# Orientation to Ontario

## KA QAYBGALKA BULSHADA

Waxaa jira qaabab badan oo aad door ugu yeelan karto bulshadaada. Qaar kamid ah tusaaleyaasha ayaa lagu qeexay halkaan.

### XARUMAHA NASIINADA EE BULSHADA

Inta badan deegaannada gudaha Ontario ayaa leh goob ay kooxaha bulshadu ku kulmaan. Xarumo badan ayaa sidoo kale leh goobaha kabaha taayirada leh, barkadaha dabaasha, jiiimamka iyo xarumaha ciyaaraha. Barnaamijyada dadka waawayn iyo carruurta ayaa ah kuwo bilaash ah ama lagu bixiyaa qiimo jaban.

Wac 211 si aad u hesho xarunta nasiinada ee deegaankaaga

### MAKTABADAHA DADWAYNAHA

Halkaan waxaad ka helayso qaar kamid ah noocyada barnaamijyada laga heli karo maktabada deegaankaaga:

- Ilaha Ingiriisiga oo ah luuqada labaad.
- Shaqaalaha dib u dejinta ee baxsha xogta
- Naadiyada layli guriga ee ardayda iyo naadiyada akhriska ee carruurta.
- Adeegga internetka dadwaynaha oo bilaash ah
- Buugta, CDs, DVDs, gaymamka ciyaarta, wargeysyada iyo joornaallada ku baxa Ingiriisiga iyo luuqadaha kale.

Si aad u hesho kaarka maktabada, waxaad u baahan tahay hal aqoonsi rasmi ah (baasaboorka ama ruqsada darawalka) iyo cadaynta ciwaankaaga (sida taleefanka, qarashka korontada ama fiilada).

Si aad u hesho maktabada dadwaynaha ee deegaankaaga, booqo Wasaarada Hidaha,

Ciyaaraha, Dalxiiska iyo Dhaqanka [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/opl](http://findlink.at/opl)

### GOOBAHA CIBAADADA

Sida ku cad Xeerka Xuquuqaha iyo Madax Banaanida, dadka reer Canada ayaa xor u ah ku dhaqanka diintooda. Inkastoo Ontario tahay bulsho cilmaani ah, dadka badan oo reer Ontario ah ayaa diintooda ku muujiya jameecooyinka kaniisadaha, macaabida yuhuuda, masaajida, macbadyada iyo goobaha kale ee cibaadada.

- Booqo [settlement.org](http://settlement.org) ama [findlink.at/worship](http://findlink.at/worship)
- Booqo yellow Pages oo aad ka helayso [yellowpages.ca](http://yellowpages.ca)
- Ka codso la taliyaha dib u dejinta.

### MUTADAWACNIMADA

Inaad waqtigaaga siiso wakaalad ayaa ah qaab wanaagsan oo aad kula kulmayso dadka, ku helayso khibrad shaqo aadna wax uga baranaysa bulshadaada.

- Si aad wax badan uga ogaato mutadawacnimada, booqo webseedka Dawlada Ontario [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/MCI-Active](http://findlink.at/MCI-Active)

Si aad u hesho xarunta mutadawacnimada ee deegaankaaga,

- Booqo Volunteer Canada [volunteer.ca](http://volunteer.ca) ama Shabakada Mutadawacnimada ee Ontario oo aad ka helayso [ovcn.ca](http://ovcn.ca)

Si aad wax badan uga ogaato shaqooyinka mutadawacnimada u furan ee ururada khayriga ah, booqo [charityvillage.com](http://charityvillage.com) ama [findlink.at/volunteer](http://findlink.at/volunteer)

Funded by / Financé par

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>